IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Agoosto 1988 L. 8

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 19 Juun 1988, Oggolaansho Jinsiyad loo oggolaaday Xuseen Maxamed Xuseen. Bog; 565

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.6.87, Bed. Naado Dhul J.le Maxamed Cali Abtidon L.382 » 566

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA HOOSE MUQ. 18.3.87, Saxid Qalad Maxamuud Socdaal Fiidow L. 383 » 568

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.7.88, Lumid Buug Kayd L. 29196 ku qoran Xasan Yuusuf Maxamed L. 384 » 569

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.7.88, Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Axmed Maxamed Ciise L. 385 » 570

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.88, Lumid Jeeg War. L. 579634 ku qoran C/salaan Maxamed Muuse L. 386 » 571

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Axmed Maxamed Xuseen L. 387 » 572

MAXKAMADDA G. MUDUG 17.7.88, Lumid 9 Jeeg War. ku qoran Cabdulqaadir Xasan Maxamuud L. 388 » 573

MAXKAMADDA G. MUDUG 17.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Axmed Diiriye Maxamuud L. 389 » 574

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.7.88, Lumid Jeeg War. L. 165860 ku qoran C/samad Cali Xaashi L. 390 » 575

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.7.88, Lumid Buug Kayd L. 3088 ku qoran Cali Sugaal Cismaan L. 391 » 576

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Aadan Maxamed Xersi L. 392 » 577

DAWLADDA HOSE MUQ. 22.1.87, Naado Dhul J.le Cabdullaahi Cabdi Caalin L. 383/bis » 567

DAWLADDA HOOSE MUQ. 8.4.87, Naado Dhul J.le Shirkadda Ganacsiga Watco L. 383/bis » 578

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran C/raxmaan Faarax Sugaal L. 393 » 579

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.88, Lumid Jeeg War. L. 0475670 ku qoran Axmed Xu-seen Maxamed L. 394 » 580

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran C/qaadir Maxamed Aadan L. 395 » 581

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.88, Lumid Jeeg War. L 0975504 ku qoran Naasir Soomane Khayre L. 396 » 582

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 19 Juun 1988, Oggolaansho Jinsiyad loo oggolaaday Xuseen Maxamed Xuseen.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 4aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Qodobka 12aad ee Nidaamka Dhismaha Dawladda lr. 14 ee 3.6.62 iyo Isbadalkii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY: Qodobka 4, 13, iyo 14 ee Sharciga Lam. 28 ee 22.12.62 oo ku saabsan Oggolaanshaha Jinsiyadda Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 3,4.5, ee Xeer Madaxweyne Lam. 129 ee 19.2.62;

MARKUU ARKAY: Arjiga Taariikhdiisu ahayd 31.5.70 ee uu qortay Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen, si uu u helo Jinsiyad Soomaaliyeed;

MARKUU HUBIYEY: Waafaqsanaanta Dikomentooyinka ku xusan Qodobada 4 iyo 6 ee Sharci lam. 28 ee 22.12.62;

MARKUU ARKAY: Warqad lam. XMKL/C-008/87 ee ka soo baxday Madaxweyne ku xigeenka 2aad ee JDS, ahna ku xigeenka 1aad;

MARKUU DHAGAYSTAY: Golaha Wasiirada;

MARKUU DHAGAYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

( Qod. 1aad )

Waxaa si sharci ah loogu oggolaaday, In Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen, la siiyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

( Qod. 2aad )

Jinsiyadda Soomaaliyeed, waxaa ku weheliya oo kale Xaaskiisa iyo Carruurtiisa aan qaangaarin.

( Qod. 3aad )

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa, marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Juun 1988

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

## QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

### DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

### WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

### BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaan idin ogeysiineynaa in dhulka uu soo codsaday J.le Maxamed Cali Abtidon oo laga helo Degmada Yaaqshiid ee lagu soo diray warqadda Lam. WHG/3/23/174 Taariikh. 31.1.78 in uu dhulka iska beddelay sidatan: 30X20 lana mid ah 600/= mq. ee ma aha sida lagu soo diray 40X30 = 1.200 mq.

SOOHDIMIHIISA WAA SIDATAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga:Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Waddada Balcad
Muqdisho, 28 Juun 1987

Haddaba waxaan idinka codsaneynaa in aad ku daabacdaan Buugga Faafinta Sharciga sida aan kor ku soo sheegnay.-

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 382

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD MAGAC LA SAXAAYO

Waxaan idin ogeysiineynaa in J.le Maxamuud Socdaal Fiidow uu soo codsaday taariikhdu markay ahayd 12.12.80, cad dhul ku yaal Degmada Wadajir, loona oggolaaday, qaab-kiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna yihiin mt. 20X30 kuna fadhiya mq. 600.

Waxaana loogu Faafiyey magac qalad ah Maxamed Socdaal Fiidow, magaca saxa ah waa:- Maxamuud Socdaal Fiidow.

Sidaas awgeed muddadii hore oo lagu soo diray war-qadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/853 taariikhdeeduna ahayd 23 Maarso 1981.

SOOHDIMIHIISA WAA SIDATAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 65 W.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 53 W.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 18 Maarso 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 383

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA MAAMULKA DHULKA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdullaahi Cabdi Caalin uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawlada Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.12.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan qaabkiisuna yahay Retangol adcimmiisuna yihiin 10X30 kuna fadhiya 300 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad kale
Koofur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhulkiisi hore

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah..

Muqdisho, 22 Jan. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA EE D/H.
(Jaalle Aadan Xaashi Nuur)

L. 383/bis

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA EE DAWLADDA HOOSE

Waxaa la cadaeynayaa in Shirkadda Ganacsiga Watco uu soo qoratay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 7.12.1986 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed an oo ku yaal Muqdisho, Degmada Waaberi ee Waddada Xalane, Dhulka la siiyey wuxuu u qaybsan yahay laba qaybood:

A) Qaybta Kowaad Qaabkiisu waa Reitangolo, Aadimihii-suna waa 34X36 kuna fadhiya mq. 1.224/—

B) Qaybta labaad Qaabkiisu waa Reitangolo, Aadimihii-suna waa 34X20 kuna fadhiya mq. 680/—.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDATAN:

A) Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Xalane
B a r i waxaa ka xiga: Warshadda Bayl

B) Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul dad
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Xalane
B a r i waxaa ka xiga: Warshadda Bayl

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Apr. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 367

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Yuusuf Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 29196 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1066 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 29196 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xasan Yuusuf Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 99.000 oo ku qoran Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 384

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Xaliimo Garaad Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 11 Jeeg War. ee hoos ku taxan, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.010.000/= kuna wada qoran magaca J.le Axmed Maxamed Ciise sida ku cad warqadda lam. 6538 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kydka Soomaaliyeed Laanta Baran;

| J.W.No. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0203529 | 100.000 | Axmed | Maxamed | Ciise | Baran |
| 0203530 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203531 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203532 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203533 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203534 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203535 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203536 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203537 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0203538 | 100.000 | » | » | » | » |
| 569473 | 10.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku xusan lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.010.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran in ay siiso J.le Xaliimo Garaad Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.010.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le C/salaan Maxamed Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 589634 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Sheekh Saalax sida ku cad warqadda lam. 6882 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 589634 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Sheekh Saalax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran in ay siiso J.le C/salaan Maxamed Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 386

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Maxamed Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. Lam. 0728300-0728299 kuna kala jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 guud ahaan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Xuseen;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0728300-0728299 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 5aad in ay siiso J.le Axmed Maxamed Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000 oo ah bedelkii Jeegagga War .ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

.. 387

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Xasan Maxamuud oo Daneeye u ah Agoontii Marxuum:- Aadan Xasan Maxamuud, uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan kuna qoran magaca Marxuum: -Aadan Xasan Maxamuud oo ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo 25.5.1988;

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 27.6.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in ay Jeegaggaasi lumeen, Baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qod, 69aad ee Xeer Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAY

In la baabi'iyo Jeegagga hoos ku taxan oo horay looga qaatay Laanta B.G.K.S, ee Gaalkacyo, loona cusboonaysiiyo Marxuumka kor ku xusan Jeegagga kala ah:-

| | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1) | J.W. | Lr. | 1137438 | ayna | ku | qoran | tahay | Sh.So. | | | 100 000/= |
| 2) | » | » | 1137439 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 3) | » | » | 1137440 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 4) | » | » | 1137441 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 5) | » | » | 1137442 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 6) | » | » | 1137443 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 7) | » | » | 1137444 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 8) | » | » | 1137445 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |
| 9) | » | » | 1137446 | » | » | » | » | » | » | | 100 000/= |

Ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faaifnta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah; haddii aan is hortaag laga keenin muddadaas ka hor, waana in Jeegagga cusub gacanta laga geliyaa Daneeye:- Cabdulqaadir Xasan Maxamuud amase cid Wakaalad Sharci ah ka sidata isaga.

Gaalkacyo, 17.7.1988

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/MUDUG

(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

## MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle:- Axmed Diiriye Maxamuud Tr. tahay 25.6.1988 uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku qoran, oo uu ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo 25.5.1988;

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 27.6.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in ay Jeegaggaasi lumeen. Baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer Sharci L. 2 soo-na baxay 9.9.1965kii.

### WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegagga hoos ku qoran oo uu Jaallahaa-si Bangiga horay uga qaatay, loona cusboonaysiiyo Jeegag u dhigma, Jeegaggaas oo kala ah:-

1) J.W. Lr. 1137419 ayna ku qoran tahay Sh.So. 100.000/=
2) » » 729313 » » » » » » 13.000/=

Ka dib markii go'aankaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah; haddii aan muddadaas ka hor ishortaag laga keenin, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle:- Axmed Diiriye Maxamuud amase qof Wakaa-lad Sharci ah ka wata.

Gaalkacyo, 17.7.1988

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

F. 389

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/samed Cali Xaashi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 165860 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdisamed Cali Xaashi sida ku cad warqadda lam. 7032 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jilib;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 165860 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jilib kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdisamed Cali Xaashi.

WAXAA LA AMRAYAA

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Jilib in ay siiso J.le Cabdisamed Cali Xaashi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faarinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 390

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Sugaal Cismaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 3088 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.573.33 kuna qoran magaca J.le Cali Sugaal Cismaan sida ku cad warqadda lam. 203 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 3088 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiiglay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.573.33 kuna qoran magaca J.le Cali Sugaal Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiiglay in ay siiso J.le Cali Sugaal Cismaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 10.573.33 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 391

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aadan Maxamed Xirsi;

HADDUU TIXGELIYEY: in ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1156497-1156498 kuna kala jirto lacag dhan min Sh. So. 100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Maxamed Xirsi sida ku cad warqadda lam. 7098 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1156497-1156498 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Maxamed Xirsi.

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Aadan Maxamed Xirsi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 392

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Faarax Sugaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku tilmaaman kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.700.000 kuna wada qoran magaca Cabdiraxmaan Faarax Sugaal, sida ku cad warqadda Lam. 7219 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

| J.W.No. | Taarii. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|---|
| 0179530 | 16.6.88 | 500.000 | C/raxmaan Faarax Sugaal | Xarunta |
| 0179531 | » | 500.000 | » » » | » |
| 0179532 | » | 200.000 | » » » | » |
| 0158794 | 19.5.88 | 500.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1960dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku xusan laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.700.000 kuna wada qoran magaca C/raxmaan Faarax Sugaal.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, in ay siiso J.le C/raxmaan Faarax Sugaal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.700.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan ka imaanin wax ishortaag ah.

Muqdisho, 28.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 393

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/raxmaan Faarax Sugaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0475670 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Axmed Xuseen Maxamed sida ku cad warqadda lam. 7219 kana soo baxday Bangiga Ganaesiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0475670 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xuseen Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.le Cabdiraxmaan Faarax Sugaal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka wareegto muddo aan ka yarayn 15 beri laga bilaabo maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 394

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/qaadir Maxamed Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0753792_0753793 kuna kala jirto min Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Aadan, sida ku cad warqadad lam. 7212 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marko;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0753792_0753793 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marko, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Barko, in ay siiso J le C/qaadir Maxamed Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 395

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Naasir Soomane Khayre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0975504 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Naasir Soomane Khayre sida ku cad warqadda lam. 7371 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0975504 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Naasir Soomane Khayre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J.le Naasir Soomane Khayre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedel Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 396